# Waxbarashada Iskudhafan ee Iskuulka Lagu Qaadanayaa Waxay Bilaabmaysaa Isniinta! Macluumaad Muhiim ah iyo Wixii Warar ee Cusub

**Maarso 31, 2021**

Qoysaska Fasalada Koowaad iyo Xanaanada ee Qaaliga PPS,

Waxaanu rajeyneynaa in fasaxii gu'gu uu ahaa mid aad ku nasateen, isla markaana nabdoonaa. Waxa aanu aad uga hawlaneyn inaanu isku dubaridno waxyaabihii yaryaraa ee loo baahnaa in la dhammeystiro sidii ay iskuuladeena ugu soo noqon lahaayeen ardayda una qaataan waxbarashada iskudhafan ee fasaladoodii lagu siinayo. Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ardaydii ku aragno iskuulada ardayda fasalada labaad (2) ilaa shanaad (5) laga bilaabo maalinta Isniinta!

Qoysaska ay ardaydoodu ka qeybqaadan doonaan waxbarashad iskudhafan ee iskuulka lagu qaadanauyo, waxaan halkan ugu lifaaqnay waxoogaa macluumaad ah iyo baraarujin ka caawineysa sidii ay maalmaha ugu horeeya waxbarashada fasalada lagu qaadanayo ay diyaar ugu noqon lahaayeen ay fahmaana sida ay wax u socdaan sanadkani.

**Hagaha Dib u furida Iskuulada**

Waxaad ka heli kartaa hagaha raadka ku leh COVID-19 marka aad gujiso halkan. Tilmaamuhu wuxuu ku siinayaa sidii aad ula socon lahayd heererka COVID-19 ee bulshadeena oo ay ka mid yihiin agabka CDC ee kaa caawinaya sidii aad u qiyaasi lahayd khatarahа iyo faa'iidooyinka inaad barato xulushada aad heli karto.

**Buqshada Ku Saabsan Dib u Furida Iskuulka oo Muuqaal ah Loo Diyaariyey Qoysaska iyo Ardayda**

Waxaan ardayda iyo qoysaska u diyaarinay xaashiyo ay ku xardhan yihiin tilmaamo taxane ah si ay dib u eegis ugu sameeyaan. Xaashiyahani qoraalka ku qorani wuxuu idiin fududeynayaa sidii aad diirada u saari lahaydeen sawirka dhabta ah ee iskuulada PPS, inuu idinka caawiyo inaad hore ka sii baratаan ka hor maalinta koowaad ee la bilaabayo waxbarashada iskudhafan ee iskuulada ardayda lagu siinayo. Mowduucayada waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Raacintaanka Baska
- Imaanshaha Iskuulka
- Sida ay u Ekaan Doonaan Fasaladu

- Sida Loo Soconaya Hoolasha Iskuulka Dhexdiisa
- Xirashada Maaskarada(afsaabka) Marka La Joogo Iskuulka
- Dhaqista Gacmahaaga
- Quraac iyo Qaddo
- Waan Jiranahay: Maxaan Sameeyaa?
- Ka Tegista Iskuulka

Xaashida (boostarka) ugu dambeeyaa waa Liistada Iska Baarista Jirada ee Maalinlaha ah. Fadlan waxaad ogaataan in dhammaan shaqaalaha iyo waalidiinta/daryeelayaasha ardayda looga baahan yahay inay **maalin walba** calaamadaha jirada iska baaraan ka hor inta ayna soo galin iskuulka ama ayna baska PPS soo korin. Liistada waxaa loo kala saaray waxa aad u baahan tahay ee aad raadineyso.

**Foomka Oggolaanshaha Baaritaanka iyo Habmaamulka Bukaanka COVID-19**
Tusaale ahaan marka la xaqiijio inuu jiro bukaan COVID-19 ama bukaan aan wali la xaqiijin, PPS waxa ay raaci doonaan Habmaamulka Bukaanka lagu maamulo, kuwaasi oo aad ka heli kartaan idinka oo marka aad gujisaan halkan.

Intaas waxaa dheer, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay qoysaska ka codsanayaan inay siiyaan oggolaanshaha inay ardaydooda ka baaraan COVID-19 ka hor maalinta ugu horeysa ee waxbarashada iskudhafan. Waxaad nuqul foomka oggolaanshaha ka heli kartaan Hay'ada Caafimaadka Oregon marka aad gujisaan halkan.

Marka aad buuxisaan ka dibna aad saxeexdaan foomka, fadlan waxaad u soo email- gareysaa xoghayaha iskuulka ardaygaaga. Waxaad macluumaadkani ka heli kartaan shabakada iskuulkaaga. Haddii aanad u diri kareyn iskuulka ardaygaaga, waxaad sameyn kartaa inaad daabacato ka dibna aad u gudbiso nuqulka warqada ah ee foomka oggolaanshaha iyada oo aad siineyso xoghayaha dhismaha iskuulkaaga ama u sii dhiib ilmahaaga si uu iskuulka u geeyo maalinta ugu horeysa ee la qaadanayo waxbarashada isku dhafan.

Tani waxaa looga baahan yahay kaliya ardayda iskuulada u imanaya sidii ay u qaadan lahaayeen waxbarashada iskudhafan.

**Gaadiidka iyo Cuntada**
Waxa aan qoysaska la wadaagnay todobaadkii la soo dhaafay faahfaahin muhiim ah oo ku saabsan sida ay ardayda waxbarashada iskudhafan iskuulada ku qaadanaya iyo kuwa wali guryaha ku qaadanayaa u heli karaan cuntad xilliga gu'ga.  Waxa aanu bixinay addeeg malyuumaada cunto ah ilaa intii xanuunka faafaya bilowday iyada oo aan rajeyneyno inaan sii wadi doono inaan siino addeegani muhiimka ah ardaydayada bilaha soo socda. Kooxaha Addeegyada Cuntadu waa diyaar!

Waa inaad sidoo kale habeen hore heshay email habeenida Axada ay kuu soo direen Addeegyada Gaadiidka, kuna saabsan sida loo raadiyo jidka basku marayo iyo wakhtiyada ardaygaaga laga qaadayo, tilmaamaha sida loo raaco baska, shuruudaha looga baahan yahay qoysaska haysta caruurta yaryar sida ay goobta kula kulmayaan iyo waxyaabo badan oo kale. Waxaad ka heli kartaa fariitnaasi sanduuqa fariimuhu email-kaaga kuugu soo dhacaan ama marka aad halkan gujiso.

**Fiidiyaal**

Waxaan rajeyneynaa inaad waqti yar siisid sidii aad u daawan lahayn fiidiyaasha ka hadlaya dib u furista oo kuu diyaar ah. Fiidiyaashu waxay ku tusi sida loo habeeyey waxbarashada iskudhafan ee iskuulada PPS, sida si nabadgleyo leh loo raaco baska iyo in badan oo kale. Waxaad ka heli kartaa fiidiyaasha iyo macluumaad dheeraad ah halka pps.net/reopen2021.

Ugu dambeyn, fadlan waxaad xasuusnaataa caafimaadka iskuuladeenu waxay ku xiran yihiin qoys kasta. Sidaas darteed, waa in aynu si wada jir ah u wada ilaalinaa badqabka iskuuladeena iyo bulshadeena. Haddii ilmuhu jiran yahay, waa in ay guriga joogaan. Iyo marka aynu joogno dhismayaasha iskuulka, qof kasta waa inuu xirtaa maaskarada afka lagu daboolo- xitaa haddii lagu tallaalay.

Bishani waxay ku suntan tahay markii ugu horeysay muddo sanad ka badan inay tiro doora oo arday ahi iyo shaqaale ay joogaan iskuuladeena. Iyo iyada oo arday badani, markii ugu horeysay ay waxbarashadooda fasalada PPS ku qaadan doonaan. Xitaa waqtiyada caadiga ah ee badanm maalmaha ugu horeeya iskuulka waxay noqon karaan kuwa dareen shucuureed leh oo ay maalin ama labo maalmood ay kugu qaadato sidii aad ula qabsan lahayn. Waxaan rajeyneynaa inaad nagala qeybqaataan sidii aan u noqon lahayn kuwa dabacsanaan muujiya,diiradana saara nabadgelyada iyo caafimaadka, iyo inaan ka mahadcelino farxada bilowga iskuulka, faraxa waxbarashada iyo inaan gaarnay waqtigii aan si nabadgelyo leh aan dib ugu soo dhaweyneyno ardayda iyo shaqaalaha fasalada iskuuladeena.

Waxyaabo fara badan oo kale ayaan todobaadkani idin soo gaari doona, oo ay ka mid yihiin iskuul kasta. Fadlan isha ku hay sanduuqa email-kaaga labada maalmaha soo socda.

Mahadsanid.